

Lacagaha lagu Dallaco ee Qiimaysan

Waxaad xaq u leedahay in aad hesho “Qiimaynta Daacad Fiican” (Good Faith Estimate)* oo laguugu sharxayo qiimaha uu daryeelkaaga caafimaadku noqon karo.

Sida uu sharcigu dhigayo, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku waxay u baahan yihiin in bukaannada aanan caymis lahayn ama aanan caymis isticmaalayn ay qiimayn ka siiyaan biilka ama qaansheegga ku toosan adeegyo gaar ah oo laga helo isbitaalka iyo adeegbixiyaha.

- Waxaad xaq u leedahay in aad hesho Qiimaynta Daacad Fiican ee ku toosan kharashka ama qiimaha guud ee laga filayo shayada ama adeegyada aanan degdegga ahayn. Waxaa tan ka mid ah kharashyada sida baaritaannada caafimaadka, daawada rijeetada ama takhtar qoro iyo khidmadaha isbitaalka.
- Bixiyahaaga daryeelka caafimaadku waa in uu adiga qoraal kugu siiyo Qiimaynta Daacad Fiican ugu yaraan 1 maalin oo shaqo ka hor ballantaada aad ugu tagayso adeeg caafimaad. Waxaad weliba bixiyahaaga daryeelka caafimaadka weydiisan kartaa Qiimaynta Daacad Fiican ka hor inta aadan qorshaysanin adeegyada.
- Haddii aad hesho qaansheeg ugu yaraan \$400 dhaafsan Qiimaynta Daacad Fiican, waxaan annagu kuu sharxi karnaa habsocodka ama nidaamka doodda. La xiriir lataliye maaliyadeed (financial counselor) (eeg macluumaadka xiriirka ee hoose).
- Waxaan adiga kugula talinaynaa in aad kaydsato oo aad haysato nuqulka ama sawirka Qiimaynta Daacad Fiican.

Su'aalaha ama macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan xaqa aad u leedahay Qiimaynta Daacad Fiican, u booqo cms.gov/nosurprises.

Lataliyaha maaliyadeed ee isbitaalka Seattle Children's kala xiriir halkan financialcounseling@seattlechildrens.org ama ka wac lambarka 206-987-3333 si aad:

- U codsato qiimaynta adeegyada
- Uga waraysato habsocodka doodda
- Wax uga barato Barnaamijka Gargaarka Maaliyadeed (Financial Assistance Program)
- Gargaar uga hesho codsashada caymiska daryeelka caafimaadka

Haddii aad afceliye u baahan tahay, wac lambarka 1-866-583-1527 oo weydiiso in laguugu gudbiyo lataliye maaliyadeed oo laga helo khadka gaarka ah 7-3333.

*Qiimaynta Daacad Fiican ma aha sicirka ama qiimaha saxda ah maxaa yeelay annagu hore uma ogaan karno nooca iyo qiyaasta daryeelka adiga iyo adeegbixiyahaagu aad go'aamin doontaan in loo baahan yahay. Qaansheeggaaga ama biilkaaga ayaa tilmaami doona adeegyada aad dhab ahaan heshay.

Adeegyo Afceliye Bilaash ah

- Isbitaalka gudihisa, weydii kalkaalayahaaga.
- Isbitaalka dibaddiisa, soo wac Khadka Afcelinta Qoyska (Family Interpreting Line) ee bilaashka ah, 1-866-583-1527. Afceliyaha u sheeg magaca ama khadka gaarka ah ee aad u baahan tahay.

Isbitaalka Seattle Children's waxuu adeegyo afceliye oo bilaash ah ugu deeqaa bukaannada, xubnaha qoyska iyo wakiillada sharciiyeed ee dhego la' ama dhego culus ama ku hadla luqad aanan af Ingiriisi ahayn. Isbitaalka Seattle Children's waxuu macluumaadkan ku soo diyaarin doonaa qaabab kale marka la codsado. Xarunta Khayraadka Qoyska (Family Resource Center) ka soo wac lambarka 206-987-2201. Waxaa buugyarahan dib u eegay shaqaalaha bukaanka ee isbitaalka Seattle Children's. Hase yeeshee, baahiyahaaga ayaa gooni kuu ah. Ka hor inta aadan macluumaadkan tallaabo ku qaadin ama isku hallaynin, fadlan la hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

© 2022 Seattle Children's, Seattle, Washington. Xuquuq dhammaan reeban.



Seattle Children's
HOSPITAL • RESEARCH • FOUNDATION

4/22
PE3695SO

Estimated Charges

You have the right to receive a “Good Faith Estimate”* explaining how much your medical care may cost.

Under the law, healthcare providers need to give patients who do not have insurance or who are not using insurance an estimate of the bill for certain hospital and provider services.

- You have the right to receive a Good Faith Estimate for the total expected cost of any non-emergency items or services. This includes related costs like medical tests, prescription medicine and hospital fees.
- Your healthcare provider must give you a Good Faith Estimate in writing at least 1 business day before your appointment for a medical service. You can also ask your healthcare provider for a Good Faith Estimate before you schedule the services.
- If you receive a bill that is at least \$400 more than your Good Faith Estimate, we can explain the dispute process. Contact a financial counselor (see contact information below).
- We recommend saving a copy or picture of your Good Faith Estimate.

For questions or more information about your right to a Good Faith Estimate, visit cms.gov/nosurprises.

Contact a Seattle Children’s financial counselor at financialcounseling@seattlechildrens.org or by calling 206-987-3333 to:

- Request an estimate for services
- Ask about the dispute process
- Learn about our Financial Assistance Program
- Get help with applying for healthcare coverage

If you need an interpreter, call 1-866-583-1527 and ask to be connected to a financial counselor at extension 7-3333.

*A Good Faith Estimate is not an exact price since we may not know in advance the type and amount of care you and your provider will decide is needed. Your bill will reflect the actual services received.

Free Interpreter Services

- In the hospital, ask your nurse.
- From outside the hospital, call the toll-free Family Interpreting Line, 1-866-583-1527. Tell the interpreter the name or extension you need.

Seattle Children’s offers free interpreter services for patients, family members and legal representatives who are Deaf or hard of hearing or speak a language other than English. Seattle Children’s will make this information available in alternate formats upon request. Call the Family Resource Center at 206-987-2201. This handout has been reviewed by clinical staff at Seattle Children’s. However, your needs are unique. Before you act or rely upon this information, please talk with your healthcare provider.

© 2022 Seattle Children’s, Seattle, Washington. All rights reserved.



Seattle Children’s
HOSPITAL • RESEARCH • FOUNDATION

4/22
PE3695